

Liiska codsiga gunooyinka shaqo la'aanta.

Waxaad u qalmi kartaa gunooyinka shaqo la'aanta haddii aadan awoodin inaad shaqayso COVID-19 awgiis.

Qaybaha qaar waxaa ku jira:

- Loo shaqeeyahaadg ayaa ganacsiga si ku meel gaar ah u xiraysa si ay u raacdo amarada ku dhaqanka tilmaamaha gobalka.
- Si ku meel gaar ah ayaa lagaaga saaray shaqada ama saacadahaaga shaqada ayaa hoos loo dhigay sabab la xariirta xiriirka ganacsiga ama dalab la'aanta badeecada.

Si aad u hesho sababo kale oo la xariira COVID-19 oo saamayn kara u qalmidaada gunooyinka shaqo la'aanta, fadlan booqo esd.wa.gov/newsroom/covid-19.

Sharuuda aasaasiga ah ee u qalmida gunooyinka shaqo la'aanta:

- Waa inaad shaqayso ugu yaraan 680 saacadood sanadkaas, waana inaad heshay ugu yaraan qaar kamid ah mushaarkaaga adoo jooga gobalka Washington.
- Sanadkaaga shaqada ayaa ah afar rubuc ee ugu horeeya shanta rubuc sanad ee aad dhamaysatay kahor asbuuca aad codsiga dirsanayso.

Tusaale ahaan:

- Haddii aad gudbisay sheegashadaada bisha maarso 2020, sanadka aad caymiska heli karto waa 1, 2018 ilaa Sebteembar 30, 2019.
- Haddii aad dirsatay sheegashadaada bisha Abriil, Maayo ama Juun 2020, sanadka xisaabta shaqadaada waa Janaayo 1, 2019 ilaa Diseembar 31, 2019.

Ka fiiri xog dheeraad ah oo ku saabsan u qalmida gunooyinka shaqo la'aanka barta esd.wa.gov/unemployment/basic-eligibility-requirements.



Employment Security Department (Waaxda Amaanka Shaqada) waa barnaamij/shaqo abuurte baxsha fursad loo siman yahay. Taageerooyinka kaalmaatiga iyo adeegyada waa diyaar markii ay codsadaan shaqsiyaadka naafada ah. Adeegyada caawimaada luuqada ee dadka aan si fiican u aqoon luuqada Ingiriiska ayaa si bilaash ah lagu helayaa. Adeegga Dhagoolayaasha Washington: 711

Haddii aad isleedahay waad u qalantaa, adeegso liiskan, isku soo aruuri xogtaada una diyaar garoow inaad codsato.

Kahor intaadan codsan:

Isku soo aruurso xogta aad ugu baahan tahay si aad u dhamaystirto codsiga:

- Magacaaga, nambarka Social Security, taariikhda dhalashada iyo macluumaadka meesha lagaalaso xariiraayo.
- Taariikhdaada shaqadaada oo dhamaystiran 18 bilood ee lasoo dhaafay ayna ku jiraan:
 - magaca loo shaqeeyaha
 - ciwaanada
 - nambarka Taleefanka
 - taariikhaha bilowga iyo dhammaadka shaqada ee loo shaqeeye kasta
- Akoonkaaga bangiga iyo nambarka tixraaca bangiga, haddii aad rabto inaad codsato lacag toos akoonkaaga lagusoo galiyo

Haddii aad caadiyan shaqada ku hesho urur shaqaale, aad u shaqaysay wax ka badan 16 loo shaqeeye, ama aad ku jirtay ciidan militariga 18 bilood ee ugu danbeeyay, waxaad u baahan kartaa inaad keento xog dheeraad ah. Xog dheeri ah ka fiiri esd.wa.gov/unemployment/have-this-information-ready.

Sida loo codsado:

Waxaad ku codsan kartaa oonleenka ama taleefanka. Hase yeeshee, dadka nasoo wacaaya ayaa aad u badan hadda inaad oonleen ku codsato ayaana boobsiis badan.

Furashada ciwaan si aad oonleen ugu codsato ayaa sida ugu haboon ugu shaqaysa laabtoobka ama kumbuyuutarka wayn; Waxaad isticmaali kartaa taleefanka ama taableetka, laakiin adeegga looma samayn in taleefan lagu isticmaalo waxaana kugu adkaan karta inaad meelaha qaar aragto.

Si lamid ah inta badan wakaaladaha Gobalka Washington, Employment Security Department (Waaxda Maaraynta Gunada Shaqo la'aanta ayaa adeegsata SecureAccess Washington (SAW) si ay u maarayso galitaanka koontooyinka macmiilka. Haddii aadan mar horaba haysan ciwaanka SAW, waa inaad ciwaan furataa. Haddii aad samayso, waxaad isticmaali kartaa isla magaca iyo baasweerka si aad u gasho adeegyada oonleenka ah.

- Biloww adigoo tagaya secure.esd.wa.gov/home.
 - Si aad u hesho caawimaad dheeraad ah, adeegso tilmaamaha ku jira Tasmada Isticmaalaha Adeegga Oonleenka ah oo ku jira websetkeena qaybta Talaabada 2 ee aalada esd.wa.gov/unemployment.